**Qorshaha Guusha Ardayda Muhaajirka iyo Qoxootiga ah**

**Ka qayb galinta Bulshada**

## GUUDMARKA

---

Sanadka 2024, Sharci-dejinta Oregon ayaa ansixisay Sharciga Senate-ka (SB) 1532. Wuxuu Waaxda Waxbarashada ee Oregon (ODE) farayaa in ay dejiyo oo fuliso qorshaha waxbarashada ee gobolka oo dhan. Qorshahan waa mid la kor loogu qaadayo waxbarashada iyo waayo-aragnimada ardayda ah qoxootiga, magangelyo doon ah, ama muhaajiriinta kale.

ODE ayaa iskaashi la yeelatay Miiska Jikada ee Oregon 'Oregon's Kitchen Table' (OKT). Tani waxay ahayd in war laga maqlo bulshooyinka muhaajirka iyo qoxootiga ah ee gobolka oo dhan ee ku saabsan waxa ay jeclaan lahaayeen in ay ka arkaan qorshaha. In ka badan 450 qof ayaa ka qayb qaatay tani. Dadku waxay ku wadaageen lix luqaddood.

Soo koobidani waxaa lagu wadaagayaa wax ku saabsan nidaamka iyo sidoo kale natiijooyinka muhiimka ah.

## WACYIGELINTA IYO KA QAYB QAADASHADA

Si loo fuliyo SB 1532, ODE waxay raadisay in ay war ka maqasho kooxo badan. Waxay isugu jiraan dhallinyarada iyo qoysaska ah muhaajiriinta iyo qoxootiga. Waxaa sidoo kale ku jira ururo u adeega dhallinyaradaasi iyo qoysaskaaasi. OKT waxay u adeegsatay habkani si ay u gaarto dadka oo u maqasho fikirkooda, waayo-aragnimadooda iyo aragtidooda:

- Wareysiyo fool ka fool ah oo lala yeeshay 13 qof.
- Sagaal dhacdooyin iyo wada hadal oo ay horseed ka ahaayeen hawl wadaagayaal si talooyin looga soo ururiyo qoysaska ka tirsan bulshooyinkooda.
- Wada hadalada Zoom oo taxane ah oo lala yeeshay ururada bulshada iyo kooxaha u adeega qoysaska muhaajirka iyo qoxootiga ah.

## NATIIJOOYINKA

### Waxyaabaha loo kuurgalay ee muhiimka ah:

- Dugsiyadu in ay yihiin xarumaha waxbarashada. Ay yihiin meelo bulshooyinku iskugu yimaadaan. Ay bixiyaan ilo sidoo kale. Sidan oo kale, dugsiyadu ay door

muhiim ah ka ciyaaraan si loo taageero qoysaska guud ahaan. Dugsiyadu ay iyaga ku xiraan taageero oo ka caawiyaan iyaga in ay horumar u gaaraan siyaabo badan.

- Bulshooyinka muhaajirka iyo qoxootiga ah ee ku nool gobolkeenu ay ka kooban yihiin dad iyo qoysas leh khibrad, fikrado iyo wax aaminsanaan ballaaran.
- Ardayda iyo qoysasku ay rabaan in ay arkaan dad iyaga u eg oo luqaddooda kaga hadla dugsiga. Tiro dad ah ayaa soo jeediyay in dugsiyadu ay u arki karaan tani fursad ay waalidiinta ugu keeni karaan tabaruc ahaan oo shaqaaleysiin karaan dadka ka soo jeeda qoysaska muhaajirka iyo qoxootiga ah oo noqda shaqaalaha dugsiga ahaan.
- Dadaaladani waxay qabsoomeen intii lagu jiray doorashadii qaranka ee 2024-ka markaasi oo muhaajiriintu ay ahaayeen arrinta xudunta u ahayd ee laga hadlayay. Dad badan ayaa qaba walwal ah in qoysaska muhaajirka iyo qoxootiga ah iyo ardaydu aysan heli doonin taageerada ay u baahan yihiin. Dadka qaarkood ayaa sidoo kale ka walwalsan in kooxaha u adeega bulshooyinka muhaajirka iyo qoxootiga ah ay ku adkaan doonto in ay caawiyaan qoysaska. Si kastaba ha ahaatee, dadku waxay sheegeen in ay rajeynayaan in gobolku uu abuuri doono oo qaadi doono habab lagu caawinayo ardayda muhaajirka iyo qoxootiga ah ee ku jira dugsiyada Oregon.

**Sida dadka iyo bulshooyinku uga fikiraan guusha ardayga:**

- Waxaa jira aragtiyo kala duwan oo ku saabsan waxa “guusha ardaygu” ka dhigan tahay. Waxaa ka mid ah natiijooyinkani:
    - Tacliinta, sida darajooyin wanaagsan.
    - Bulshada, sida in ay fursado wanaagsan u horseedaan jiilka xiga.
    - Bulshada, sida isku xirnaan adag iyo xiriiro lala leeyahay dadka isku faca la yahay.
    - Dareen ahaan, sida ardayda oo dareemaysa ammaan iyo kalsooni.
- Kuwa badan ayaa raba in ardaydu guuleystaan ee dhanka noqoshada qayb ka mid ah dhaqanka Maraykanka. Isla mar ahaantaa waxaa jira walaac ku saabsan in ay ilaashadaan aqoonsigooda dhaqan.
- Dad badan ayaa qaba in ay muhiim tahay in macallimiintu wax ugu dhigaan hab la isticmaalayo caadooyinka, sifooyinka, waayo-aragnimada, iyo aragtida ardayda.
- Fursadaha isku xirnaanta bulshada ayaa siyaabo badan muhiim ugu ah guusha ardayga. Hal hab oo ballaadhan oo dadku inta badan hadal ka keenaan waa in ardayda iyo qoysaska hawlaha dugsiyada loogu daro siyaabo lagu:
    - Qirayo dhaqamada gurigooda.

- Abuurayo habab ay kaga qayb qaataan.
- Xisaabtamayo caqabadaha iyo baahiyaha qoysaska. Tusaale ahaan, qorsheynta hawlaha dugsiga waqtiyada qaarkood iyo maalmaha markaasi oo qoysaska shaqeynayaa ay ka soo qayb gali karaan.

**Milicsiga jawiga dugsiga oo soo dhaweyn leh:**

- Waa muhiim in la abuuro siyaabo waalidiinta iyo qoysaska looga qayb gelinayo waxbarashada ardaydooda. Dadku waxay rabaan in ay arkaan:
  - Istiraatijiyado lagu xaqiijinayo adeegyada turjumaadda iyo fasiraadda oo ku habboon.
  - Taageerada qoysaska si ay u bartaan sida nidaamka dugsigu u shaqeeyo.
  - Siyaabo qoysaska iyo ardayda iyaga laftoodu ay gacan uga geysanayaan qorshaha iyo ka qayb qaadashada dhacdooyinka dugsiga iyo hawlaha.
- Dadku way u mahadnaqaan marka shaqaalaha dugsigu fahamsan yihiin waayo-aragnimada ardayda. Waxay rabaan in ay arkaan shaqaalaha oo leh wacyigelin iyo faham dheeraad ah. Waxay sidoo kale rabaan in ay faham dheeraad ah u yeeshaan sida waxbarashadu u kala duwan tahay dhaqamada kale. Tani waxaa ka mid ah doorka waalidiinta laga filayo in ay ka ciyaaraan waxbarashada ardaygooda iyo waxa dugsigu ka filayo waalidiinta.
- Cuntadu siyaabo badan ayay muhiim u tahay. Tani waxaa ka mid ah helida siyaabo lagu buuxinayo baahiyaha cunto ee qabaan ardayda ka soo jeeda bulshooyinka muhaajirka iyo qoxootiga ah. Cuntadu waxay sidoo kale bixin kartaa hab ay dugsiyadu waalidiinta iyo ardayda uga qayb geliyaan hawlaha iyo dhacdooyinka. Iyada oo cuntaduna ay qoysaska iyo ardayda ka caawin karto in ay isku xirmaan oo dhisaan xiriiro ka dhex jira bulshada dugsiga.
- Waa muhiim in la yeesho shaqaalaha dugsiga oo leh waayo-aragnimo nololeed oo la mid ah qoysaska muhaajirka iyo qoxootiga ah ee ka tirsan bulshooyinkooda. Tani waa mid muhiim ah si loo awoodo in:
  - La abuuro jawiga dugsiga oo soo dhaweyn leh.
  - Laga caawiyo qoysaska in ay fahmaan oo qorsheeyaan nidaamka dugsiga.
- Dad badan ayaa raba in ay arkaan taageero la sii kordhiyay marka ardaydu u gudbayaan ama ka baxayaan dugsiga. Waxay sidoo kale rabaan in ay arkaan taageero dheeraad ah marka ay ardaydu u wareegaan heerka fasal oo cusub. Dad badan ayaa ka hadlay taageerida kala-guurkani:
  - Bilaabida dugsiga barbaarinta carruurta ‘kindergarten’

  - Gelida dugsiga sare.
  - U wareegida waxbarasho kale ama tababar dugsiga sare ka dib.
  - U wareegida dugsi cusub.
- Kuwo badan ayaa raba in ay xaqiijiyaan in dugsiyadu diyaar u yihiin taageerida ardayda ku cusub Maraykanka marka ay gelaan nidaamka dugsiga markii u horreysay. Tani gaar ahaan waa baahi ay qabaan ardayda ka imaanaysa degaan adag.

**DADAALADA MUSTAQBALKA**

Dadka ka qayb qaatay nidaamkani waxay u heelan yihiin in ay wax badan ka hadlaan mawduucan. Waxaan soo jeedinaynaa in ODE ay macluumaadka cusub iyo natiijooyinka la wadaagto dadka ka qayb qaatay nidaamkani.

Mustaqbalka, ODE waxay raadin kartaa siyaabo dad badan oo kala duwan oo ah bulshooyinka muhaajirka iyo qoxootiga ah looga qayb geliyo kuwaasi oo ku nool Oregon. ODE waxay sidoo kale diiradda saari kartaa dadaalada mustaqablka ee meelaha qaarkood ee gobolka. Tani waxaa ka mid noqon kara bulshooyinka ku nool Bariga Oregon iyo sidoo kale degaanada dadkoodu hooseeyo.

Talooyin badan oo la wadaagay ayaa ah tallaabooyin aysan ODE fulin karin. Markaa waxaan ugu baaqaynaa ODE in ay aragtidani la wadaagto dugsiyada degmada. Talooyinkani waxay sidoo kale bixinayaan fursad ay dugsiyada iyo degmooyinku iyaga laftoodu ugu lug yeeshaan oo iskaashi kula yeeshaan qoysaska muhaajirka iyo qoxootiga ah ee ka tirsan bulshooyinkooda.